# Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa



# Samuu'eel, Inankii Ilaah - Adeegihii

Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Janie Forest
Alastair Paterson


Waxa dhaqan-geliyay: Lyn Doerksen

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2025 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Xannaah waxay ahayd gabadh wanaagsan, qabayna Elqaanaah, ahaana nin wanaagsan. Labadooduba waxay caabudi jireen Ilaah oo dadka kalena way roonaan jireen. Laakiinse Xannaah nolosheeda




waxbaa ka maqnaa oo ay tabaysay. Waxay dooneysay inay ilmo dhasho. Alla, siday u doonaysay ilmo! Wey sugtay, oo ay Alla-bariday oo sugtay in badan. Ilmo ma aysan dhalin!



Sanad walba, Xannaah waxay tagi jirtay Macbudka Ilaah si ay u soo cibaadaysato. Sanad bay axdi ama ballan la gashay Ilaah oo hadduu Isaga siiyo wiil, iyadu inay siiso wiilkaa inuu u ahaado adeego Ilaah weligii iyo weligiiba adeege.

Odaygii ahaa wadaadka Ceelii ayaa arkay Xnnaah oo baryootamaysa.






Markaaasuu mooday
inay khamri ku
sarkhaansan
tahay sabataoo ah
bushumaheda keliya
ayaa dhaqdhaqaayay,
laakiin codkeeda
lama maqlaynin.
Ceelii na wuu
canaantay!



Laakiinn Xannaah axay u sheegtasy Ceelii waxyaalo ku saabsan baryaydeeda iyo ballanta ay la galayso Ilaah. "Nabad ku tag," Ceelii baa sidaa ugu jawaabay. "Ooo Ilaaha reer Binu Israa'iil ha ku siiyo baryaadaadii aad weyddiisatay. Ereyadii Ceelii Xannaah waxay siiyeen rajo."

Durbadiiba farxad weyn baa ka buuxsantay qalbiga Xannaah. "Rabbiguna iyadii wuu xusuustay" wuuna u aqbalay baryadeedii. Iyada Elqaanah ilmo yar baa u dhashay oo waxay u bixiyeen magaciisa Samuu'eel (Oo la micne ah "Ilaah baa maqlay"). Laakiin Xannaah ma xasuusnaysaa ballantii Ilaah?





Xannaah waxay joojisay aadiddii ay sanad kasta tagi jirtay macbudka. All, gacaliso! Miyeyse jabisay ballantii Ilaah? Maya, Xannaah waxay sugeysay intuu samuu 'eel soo korayay si uu ugu noolan karo macbudka oo uu uga caawin karo howlaha adeega Ilaah Ceelii. Dabadedna waxay keentay ama geysay macbudka isagii.


Ilaahay Xannaah wuxuu ku xurmeeyey iimaankeedii weynaa.




Samuu'eel ka dib Ilaahay wuxuu siiyey saddex wiil iyo laba gabdhood oo dheeraad ah. Sanad walbana, Xannaah waxay tagi jirtay macbudka oo ku caabudi jirtay oo u keeni jirtay khamiis cusub oo ay Samuu'eel u soo samaysay.

Samuu'eel keligii ma ahayn kan keliya ee caawiye Ceelii. Ceelii wiilashiisa, Hofnii iyo Fiiexaas, xitaa meesha ayay ka shaqayn jireen. Laakiin way sharaf ridi jireen Ilaah oo waxyaalo xun xun bay sameyn jireen, oo xitaa markii uu Aabbahood Ceelii uu baryo iyaga. Ceelii waxay ahayd inuu ka eryo howlaha adeega macbudka. Laakiin sidaasi ma aysan dhicin.





Habeen baa waxaa dhacay, in Samuu'eel maqlay cod u yeedhaya isaga. Wiilkii wuxuu mooday inuu Ceelii u yeedhayo. "Waa I kan," ayuu yidhi. "Kuuma aan yeedhin" buu ugu jawaabay Ceelii. Tani waxay dhacday saddex jeer. Dabadeed Ceelii wuxuu gartay Ilaah inuu doonayo inuu la hadlo Samuu'eel.



Ceelii wuxuu SAmuu'eel ku yidhi, "Hadduu kuu yeedho inaad ku tidhaahdid, 'Rabbiyow ila hadal, waayo anoo addoonkaaga ah waan ku maqlayaaye." Oo Ilaah baa u yeedhay kol kale, oo u sheegay farriin cajiib ah.


Aroortii markii la gaaray ayaa Ceelii yu yeedhay Samuu'eel. "Waxa Rabbiga kuu sheegay waa maxay?" ayuu weyddiiyey. Kuraygii Samuu'eelna wuxuu u sheegay waxwalba. Waxay ahayd farriin aad u naxdin badan – Ilaah wuxuu doonayay inuu baabi'iyo Ceelii reerkiisa oo idil sababtoo ah Hofnii iyo Fiiexaas xumaantooda darteed.




Digniintii Ilaah run bay noqotay. Wakhtigii lagu jiray dagaalkii Falastiin, labdiisii wiil ee xumxumaa Ceelii waxay hor wadeen sanduuqii axdiga ciidankii reer binu Israa'iil. Cadowgii waxay qabadeen sanduuqii axdiga oo Xofnii iyo fiinexaas wey dileen iyo qaar badan oo reer Binu Israa'iil ah. Markii uu maqlay Ceelii arrintii, kursigii buu ka dhacay, oo qoorta ayuu ka jabay deedna wuu dhintay isla maalintaa.




Sanduuqii Ilaah dhibaato ayuu u keenay reer Falastiin. Waxayna geeeyeen oo dhigeen macbudkii sanamka Daagoon, Ilaahoodii beenta ahaa. Aroortii waxay arkeen Daagoon oo wajiga ugu dhacay sanduuqii Rabbiga hortiisa. Falastiiniyiintii kor bay u qaadeen daagoon laakiin aroorti dambe waxay arkeen inuu haddan hoos u dhacay. Wakhtigan Daagoon wuxuu u kala jajabay
qayb
qayb.



Cuduro iyo dhimasho baa aad ugu badatay reer Falatiin dhexdoodii. Waxayna u arkeen haddiiba inuu Ilaah iyaga ciqaabayo, falastiiniyiintii waxay xidheen laba sac oo jiidda kareetada (gaari dameer) sanduuqa Ilaah. Laakiinn waxay u daayeen weylihii. "Haddii lo'da aado xagga sare ee reer Binu Israa'iil, oo ay isaga tagaan weylahooda, waannu garan doonnaa inuu Ilaah sidaa sameeyey," oo lo'dii xaggii sare ayay aadday.





Deedna Samuu'eel, oo iminka nin weynaaday ah, ayaa la hadlay dadkii reer Israa'iil. "Haddii aad ugu soo noqotaan Rabbiga qalbiyadiina oo dhan ...... wuxuu idinka samatabixinayaa gacanta reer Falastiin." Dadkii wey addeeceen Ilaah iyo nabigiisii daacadda ahaa. Oo gacantii Ilaahna waxay ku dhacday reer Falastiin maalmihii Samuu'eel oo dhan.

# Samuu'eel, Inankii Ilaah – Adeegihii

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

1 Samuu'eel 1-7

"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiyaa." Sabuurka 119:130

# Dhammaad

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16